

Liisto-hubineedda Habraaca Ku Dhaqanka Xirfadaha ee Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga DSHS Ansaxisay

Skills Practice Procedure Checklist for Home Care Aides DSHS Approved

Liisto-hubineeddan habraaca ku dhaqanka xirfadaha waa in loo adeegsado xirfadaha barashada Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga ee ay baraan barnaamijyada tababarka ee ku saabsan shaqada ama macallimiinta bulshada iyada oo la adeegsanayo manhajka Waxyaabaha Aasaasiga ah ee Daryeelka ama agabyada tababarka kale ee la ansaxiyay. Liisto-hubineedda lagu iftiimiyey hagaha habraacan waxay muhiim u yihiin qabashada amaanka ah ee xirfadda. Hawlaha hoos lagu iftiimiyay qayb kama aha imtixaanka Prometric, haseyeeshee, *dhammaan* hawlaha taageeraya waxqabadyada nolol maalmeedka, ayaa loo baahan yahay in la soo bandhigo ama la muujiyo, iyada oo uu joogo macallin la aqoonsan yahay sida qayb ka mid ah fasalka shahaadiga ee kaaliyaha daryeelka guriga. Tababar farxad leh ayaa kuu rajeynayaa!

Tusmada Buugga

Lambarka Bogga

Hab-dhaqannada Daryeelka Guud	1
War-isgaarsiinta iyo Xuquuqaha Macmiilka	1
S.W.I.P.E.S	1
Gacmo Dhaqasho	1
Gasho Gacmo-gashiyada	2
Iska-bixi Gacmo-gashiyada.....	2
Isticmaal Qalabka Ilaalinta Shakhsiyeed (PPE).....	2
Ku Caawi Macmiilka in uu Socdo	2
Macmiilka Ka Soo Wareeji Sariir una Soo Wareeji Kursi ama Gaariga Dadka Naafada ah.....	2 / 3
Geddi oo Booska u beddel Macmiil Sariir Saaran	3
Daryeelka Afka	4
Nadiifi oo Kaydi Xirmada Ilkaha Gacan Ku Sameyska ah	4
Daryeelka Ciddiyaha	4 / 5
Daryeelka Cagta.....	5
Talooyinka Guud ee Daryeelka Ciddiyaha.....	6
Ku Caawi Macmiilka Gacan Itaal-daran ama Daciif ah leh Dhar-xirasho	6
Macmiilka u Geli Lug-gashi ama Sharabaadyo Dhaadheer oo Laastiik ah	6
Dhaqdhaqaaqa Kala Duwan ee Qaybaha Jirka ee Aan Firfircooneyn	6 / 7
Dhaqdhaqaaqa Kala Duwan ee Hal Jilib iyo Canqow ee Aan Firfircooneyn	7
Ku Caawi Macmiilka in uu Wax Cuno	7
Ku Caawi Macmiilka Qubeyska Sarriirta	7 / 8
Ka Caawi Daryeelka Saxaaxa.....	8
Daryeelka Kateetarka.....	8
Daryeelka Kateetarka Cinjirka ah (dib-u-eegis sugaya, muuji ama soo bandhig haddii uu ku habboon yahay).....	9
Caawimaadda Daawooyinka.....	10
Ka Caawi Macmiilka Isticmaalka Tuunjiga	10
Ugu Xiir Sakiin Amaan ah	10

XAQIJINTA DHAMMEYSASHADA: boggan **waa** in loo diraa TrainingApprovalTPA@dshs.wa.gov ee loogu talagalay **arday** kasta ee ka dhammeystay xirfadaha tababarka **OJT** ee ALF, AFH, ama ESF..... 11

Fadlan Ogow: Dhammaan hawlaha xirfadaha waa in uu dadka baraa macallinka la ansaxiyay islamarkaana waa in uu muujiyaa ama soo bandhigaa musharraxa shaqaalaha Kaaliyaha Daryeelka Guriga. Waxqabadka xirfadaha kaaliyaha daryeelka guriga ayaa la qiimeyn karaa iyada oo la adeegsanayo shay dad u eg oo anatoomik ahaan sax ah.

Kheyraadyo dheeri ah:

[Liisto-hubineedda Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee Prometric](#)

[Agabka U-diyar-garowga Imtixaanka Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington](#)

Liisto-hubineedda Habraaca Ku Dhaqanka Xirfadaha ee Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga DSHS Ansaxisay Skills Practice Procedure Checklist for Home Care Aides DSHS Approved

Hab-dhaqannada Daryeelka Guud - si aad ugu guuleysato xirfaddan in aad soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:	HAA	MAYA
Qofka aad tahay in aad u sheegto macmiilka marka aad bilaabeyso daryeelka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad deegsato tallaabooyinka ka hortagga caabuqa iyo taxaddarada caadiga ah si aad macmiilka iyo naftaadaba u ilaaliso inta lagu guda jiro habraacyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad dhiirrigeliso baahiyada aadane iyo kuwa bulsho ee macmiilka inta lagu guda jiro habraacyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad dhiirrigeliso xuquuqaha macmiilka inta lagu guda jiro habraacyada.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad dhiirrigeliso bedqabka macmiilka inta lagu guda jiro habraacyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad dhiirrigeliso raaxada macmiilka inta lagu guda jiro habraacyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad uga tagto agabka guud ee la adeegsado meel uu macmiilka gaari karo marka la gaaro dhammaadka daryeelka, tusaale, telefoonka, muraayadaha indhaha, hagaha meel fog wax looga hago sida kan telefshanka, warqadaha lagu tirtiro, galaaska biyaha).....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
War-iskaarsiinta iyo Xuquuqaha Macmiilka - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:	HAA	MAYA
In aad sharraxdo waxa aad sameynayso.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad u hadasho si tartiib ah, cad, oo xushmad leh	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka ka qaybgaliso oo si feejigan u dhageysato	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad u fiirsato isbeddelada macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad taageerto dookha iyo madax-bannaanida macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad ixtiraamto baahida macmiilka ee asturnaanta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
S.W.I.P.E.S. - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:	HAA	MAYA
In aad soo ururiso Sahayda inta aadan hawsha bilaabin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Dhaqdo gacmahaaga ka hor inta aadan macmiilka xiriir la yeelan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Sheegto qofka aad tahay adiga oo macmiilka u sheegaya magacaaga	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Bixiso asturnaan inta lagu guda jiro daryeelka adiga oo adeegsanaya daah, il-xir, ama albaab	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad u Sharraxdo waxa aad sameynayso macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Isha la marto goobta si aad u hubiso in aad wax kasta meeshooda ku celisay ka-dib marka aad hawshu dhammeysno ...	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo Dhaqasho - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:	HAA	MAYA
In aad xaqiijiso in sahaydu ay fududahay in la gaaro si aan loo taaban sagxad wasakheysan inta lagu guda jiro hawsha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad biyaha diirran ee waaskada lagu dhaqo shido	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si fiican u qoy gacmaha iyo curcurrada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Saabuun mari gacmaha.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Is-ku-xoq dhammaan faraha iyo gacmaha, oo ay ku jiraan curcurrada, ilaa ay ka xumboobaan Ugu yaraan 20 ilbiriqsi, adiga oo hoos aaddinaya faraha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si fiican u biyo raaci dhammaan gacmaha iyo curcurrada adiga oo aan wasakhayn gacmaha (iyada oo hoos loo aaddinayo faraha).....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adeegso tuwaal ama warqado gacmaha lagu tirtiro oo nadiif ah si aad ugu qalajiso dhammaan faraha, gacmaha, iyo curcurrada laga soo bilaabo faraha fooddooda	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adeegso tuwaal ama warqadda lagu tirtiro oo qalalan, nadiif ah ama meel ka mid ah warqadda lagu tirtiro qalalan oo nadiif ah si aad ugu xirto tuubada biyaha adiga oo aan gacmaha iska wasakhaynin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si degdeg ah ugu tuur warqadaha lagu tirtiro weelka qashinka ka-dib marka aad tuubada biyaha xirto	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Habraaca ku soo gebogabee gacmo nadiif ah adiga oo ka fogaanaya wasakheyn (tusaale ahaa, taabashada tooska ah ee meelaha tuubada laga xiro, qalabka soo saara warqadaha lagu tirtiro, waaskada lagu dhaqdo, ama weelka qashinka)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Gashashada Gacmo-gashiyada - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad dhaqdo gacmahaaga ka hor inta aadan taaban gacmo-gashiyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashi kasta ka eegto godad ama xumaan kale ka hor inta aadan adeegsan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiga kafka ka qabato oo aad gacanta kor ugu jiido	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiga kale kafka ka qabato oo aad gacanta kale kor ugu jiido	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad eegto si aad u hubiso in gacmo-gashiyada ay si debecsan ugu dhegan yihiin far kasta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska-bixinta Gacmo-gashiyada - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad hal gacan oo gacmo-gashi ku jira, kaga qabato gacmo-gashiga kale meel ka hooseysa kafka dhankiisa kor soo mara...	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiga hoos ugu jiido gacanta si dhinaca gudaha xirga uu kor u soo maro	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiga aad iska bixisay ku qabato gacanta gacmo-gashiga ku jira ka-dibna in aad kuuskuusto oo kubad oo kale ka dhigtid	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In adiga oo adeegsanaya laba farood aad gacantaada maran, ku soo qabatid hoosta kafka gacmo-gashiga labaad	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiga hoos u jiidid adiga oo kor soo marinaya dhinaca gudaha xiga sidaa daraadeed ayaa waxaad ku daboolaysaa gacmo-gashigii hore	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacmo-gashiyada iska-bixiso, gacmo-gashiyada ku rido weelka qashinka oo gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Raac tilmaamaha Xarumaha Ka-hortagga iyo Xakameynta Cudurka (CDC) si aad u aqoonsato goorta la isticmaalo Qalabka Ilaalinta Shakhsiga (PPE) iyo xirashada iyo iska bixinta PPE – si aad ugu guuleysato dhammeynta xirfadahan, raac linkiga hoose kana tababarka dhammaan borotokoollada PPE ee hadda barahaaga xirfadaha:		
	HAA	MAYA
Isticmaalka Qalabka Ilaalinta Shakhsiyeed (PPE) CDC	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku Caawi Macmiilka in uu Socdo - si aad ugu guuleysato xirfaddan in aad soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad hor istaagto oo aad wajahdo macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad ku caawiso macmiilka in uu gashado oo uu si fiican u xirto kabo aan lagu taraaraxayn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka u sharraxdo halka uu lug ku tagi doono ka hor inta uusan socodka bilaabin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka u diyaariso istaagidda adiga oo jilbaha la simaya xagal 90 digrii ah iyada oo cagahana si simman loogu dhigayo sagxadda dhulka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka kursiga horey ugu soo tiiriso ka hor inta aadan istaajin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad suunka wareejinta (haddii loo baahdo) ku xirto hareeraha moxogga dhexe ee macmiilka, si aad ugu caawiso macmiilka in uu istaago	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad u tilmaanto macmiilka in isaga oo kursiga gacmihiisa ku tiirinaya kor isku riixo oo uu istaago	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacan saarto garabka, dhabarka, dhexda, ama qabato suunka wareejinta iyadoo uu macmiilka taagan yahay	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka weyddiiso sida uu dareemayo ka-dib marka uu istaago ama isaga oo soconaya	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad adiga oo inyar u jira daba-socotid ama dhinac socotid (adiga oo ka maraya dhinaca uu daciifka ka yahay haddii uu jiro) macmiilka masaafada oo dhan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad boos u tilmaantid macmiilka ka hor inta uusan fariisan, iyada oo lugaha loogu aaddinayo dhexda halka kursiga loogu fariisto si uu u fariisto fadhi amaan ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka u tilmaanto in uu kursiga gaaro ka hor inta uusan fariisan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad gacanta saarto cududda, dhabarka, moxogga macmiilka ama, haddii la adeegsado, qabo suunka wareejinta marka macmiilka uu fariisanayo. Ka bixi suunka wareejinta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka ka tagto isaga oo si amaan ah ugu fadhiya kursiga oo miskahana ku haya dhabarka dambe ee kursiga ...	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA, macmiilku wuxuu u baahan yahay caawimaad heeggan ah si uu u socdo. Lama adeegsado aalado caawiya si uu u socdo. Macmiilka ayaa kursi ku fadhiya marka daryeelka uu bilaabanayo.		
Macmiilka Ka Soo Wareeji Sariir una Soo Wareeji Kursi ama Gaariga Dadka Naafada ah - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad guriga ama gaariga dadka naafada ah soo dhigto meel u dhow sariirta iyada oo gacanta gaariga dadka naafada ah ay qiyaastii ku dhow dahay in ay taabato sariirta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xir lugaha gaariga dadka naafada ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Isku laalaab ama ka bixi caga-saarada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka in uu isku soo rogo dhanka sariirta geeskeeda ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad taageero siiso adiga oo macmiilka ka qabanaya garbaha gadaashooda ama dhabarka iyo miskaha, ku caawi macmiilka boos fadhi	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Macmiilka Ka Soo Wareeji Sariir una Soo Wareeji Kursi ama Gaariga Dadka Naafada ah - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa (la sii wadey):

	HAA	MAYA
Ku caawi macmiilka in uu xirto kabo aanan lagu taraaraxin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad hubsato cagta macmiilka in ay si fidsan u saaran tahay dhulka ka hor inta uusan istaagin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad ku adeegsato suunka qaab-socodka / wareejinta (haddii loo baahdo) dharka korkiisa, hareeraha moxogga macmiilka iyada oo loo baneynayo meel ku filan oo keliya in la geliyo gacan fidsan inta u dhaxeysa suunka iyo jirka macmiilka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad istaagto macmiilka hortiisa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad suunka wareejinta ka qabato dhinacyada ama agagaarka dhabarka marka aad macmiilka ku caawinayso in uu istaago iyo guud ahaan inta lagu guda jiro wareejinta.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad ku xoojiso hal lug ama labada lugood ee macmiilka lugahaaga, ka-dibna in aad macmiilka u tilmaan in uu istaago....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad wareejiso macmiilka marka uu istaago sidaa awgeed ayaa xagga dambe ee lughiisa waxay ku hagaagayaan dhexda kursiga gaariga dadka naafada ah.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U tilmaan macmiilka in uu qabsado halka gacmaha la saarto ka hor inta uusan ku fariisan gaariga dadka naafada.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad si tartiib ah oo la xakameeyo hoos ugu dhejiso kursiga gaariga dadka naafada ah.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Booska u beddel macmiilka iyada oo miskaha ay taabanayaan dhabarka gaariga dadka naafada waxayna xaqiijinaysaa in jirka macmiilka uu ku toosan yahay kursiga.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka bixi suunka wareejinta / qaab-socodka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cagaha macmiilka saar caga-saaro, xir / fur gaariga naafada iyada oo la raacayo sida uu macmiilka rabo iyo/ama bedqabka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ku dhaaf gaariga naafada marka jirkiiisu uu si habboon u tooso oo cagahiisana ay saaran yihiin cago-saarka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA daryeelka ayaa ku bilaabanaya macmiilka oo sariirta jiifa. Macmiilka wuu istaagi karaa balse ma awoodo in uu socdo. Suunka wareejinta ayaa la adeegsadaa.

Geddi oo Booska u beddel Macmiil Sariir Saaran - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad fidsid madaxa sariirta, haddii aysan horey u fidsaneyn.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad istaagto sariirta dhinaceeda ka soo horjeeda jihada aad qorsheynayso in aad macmiilka u geddiso.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad macmiilka ugu baaqdo ama u tilmaanto in uu u soo sikado dhankaaga.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddii macmiilka uusan awoodin in uu u soo sikado dhankaaga, caawi adiga oo jirka macmiilka oo dhan isku hagaajinaya oo keenaya aktaada sidaa daraadeed ayaa waxaad si amaan ah u rogi kartaa macmiilka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Labada gacmoodba dhig hoosta madaxa / garbaha macmiilka waxaadna qaybtaasi jirka u soo dhaqaajisaa dhankaaga.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Labada gacmoodba hoos dhig dhexda iyo gunta jirka macmiilka waxaadna qaybtaasi jirka u soo dhaqaajisaa dhankaaga.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Labada gacmoodba hoos dhig bowdyaha iyo lugaha hoose ee macmiilka waxaadna qaybtaasi jirka u soo dhaqaajisaa dhankaaga.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U noqo dhinaca sariirta ee aad qorsheynayso in aad u geddiso macmiilka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacanta macmiilka saar xabadkiisa oo xaqiiji in lugahiisa ay u gudubsan yihiin jihada ama dhanka aad macmiilka dhinaciisa u geddin ama rogi doonto.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmahaaga saar sinta iyo garabka macmiilka ka-dibna si tartiib ah u rogi ama u geddi dhinaciisa ee xaggaaga ah (Waano: hubso in uu jirro boos lagu rogi karo macmiilka).....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka dhig meel masaafu amaan ah u jirta geeska sariirta marka dhinac loo rogo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka u dhig qaab habboon oo uu jirku isku toosan yahay.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Madaxa waa in barkin loogu taageeraa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Garabkiisa waa in la hagaajiyaa si macmiilka uusan ugu jifan gacantiisa iyada oo gacanta sare wax lagu taageerayo. Dhaaf garabka iyo qaybta hoose ee gacanta macmiilka iyaga oo aan hoostiisa ku jirin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhabarka oo lagu taageero aalad taageerta. Aaladda meelaynta (tusaale, waxyaabaha wax lagu cufo, barkin) ee lagu celiyo dhabarka la rogey lana hoosgeliyo si loo ilaaliyo booska dhinaca ah ee uu macmiilka u jiifo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Jilibka kore oo laaban, qaybta sare ee lugta oo lagu taageeray aalad taageerto iyada oo sinta si habboon la isugu toosiyay. Adeegso aalad (tusaale, waxyaabaha wax lagu cufo, barkin) si aad ugu taageerto lugta kore, ugu joogteyso isku-toosanaanta sinta sare, ku daa jilibka sare laabanaan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ku dhaaf booska dhinac-u-jiifka, iyada oo laga fogaanayo in cadaadis la saaro lafta sinta. iyadoo la kala soocayo canqawiyada iyo jilbaha.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacanta kore ku taageer aalad taageerto.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka kor kaga dabool go', iska bixi gacmo-gashiyada (haddii la adeegsadey) ka-dibna gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA macmiilka ayaa dhabar dhabar ugu jiifa sariirta marka uu daryeelka bilaabanayo.

Daryeelka Afka - si aad ugu guuleysato in aad soo bandhigto xirfaddan waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xaqiiji in macmiilka uu u fadhiyo qaab toosan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq oo gasho gacmo-gashiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Shukumaan saar xabadka macmiilka ka hor inta aadan u fidin daryeelka afka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka hor inta aadan bilaabin, weyddii macmiilka in uu jiro wax af-xanuun ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qoy cadeyga ama buraashka ka-dibna mari daawada lagu cadeysto	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku nadiifi dhammaan dusha sare ee ilkaha cadey ama buraash, adiga oo adeegsanaya dhaqdhaqaaqyo wareeg ah oo debecsan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka carabka u cadey.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka sii biyo nadiif ah oo uu afkiisa ku luqluqdo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Meel u dhow garka macmiilka baaf u hoori si aad ugu ururiso biyaha uu ku luqluqdo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Taabasho ku qalaji bushumada iyo wejiga macmiilka, waxaana ka qaadaa shukumaanka,	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaci oo qalaji baafka ka-dibna biyo raaci cadeyga ama buraasha ka hor inta aadan meel dhigin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska-bixi oo astur/tuur gacmo-gashiyada. Gacmaha iska-dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA macmiilka ayaa wuxuu fadhiyaa miis inta daryeelkan la bixinayo.		
Nadiifi oo Kaydi Xirmada Ilkaha Gacan Ku Sameyska ah - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Gashato gacmo-gashiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad adeegsato farsamo lagu yareynayo halista in ay jabaan ilkaha gacan ku sameyska ah haddii ay dhacaan inta la nadiifinayo (tusaale, iyada oo si toos ah ilkaha gacan ku sameyska ah loogu buraashayo waaskada lagu dhaqdo korkeeda iyada oo lagu dahaarayo shukumaan / maro / warqadaha lagu tirtiro, baaf gudahiisa biyo ka buuxaan)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka hortag wasakhawga xirmada ilkaha guud ahaan inta uu socdo habraaca (t.a., in la sabaysiiyo biyaha saxanka fool-dhaqa ama in si toos ah loo saaro saqxad aan ilaalsaneyn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xirmada ilkaha gacan ku sameyska ah ka soo qaad macmiilka. Haddii macmiilka uusan awoodin in uu iska bixiyo, si tartiib ah uga saarxirmada ilkaha gacan ku sameyska ah macmiilka afkiisa. Marka hore ka soo saar ilkaha gacan ku sameyska ah ee hoose, ka-dibna kuwa kore	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xirmada ilkaha gacan ku sameyska ah raaci biyo qabow oo socda ka hor inta aadan buraashka ku nadiifin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Mari daawada lagu cadeysto ama daawada lagu nadiifiyo xirmada ilkaha gacan ku sameyska ah si aad u buraashto ilkaha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Buraashka ku nadiifi ilkaha oo dhan dushooda.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaci ilkaha adiga oo hoos dhigaya biyo qabow, oo socda.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka beddelaadda iyo kaydinta xirmada ilkaha gacan ku sameyska ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaco koobka ilkaha gacan ku sameyska ah la geliyo ka hor inta aadan geliin ilkaha gacan ku sameyska ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku rid xirmada ilkaha gacan ku sameyska ah koobka ilkaha oo nadiif ah oo ay ku jiraan milan ama biyo qabow	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tuur wixii aad ku dahaartey waaskada ama agabka kale ee wasakhoobay. Iska-bixi oo tuur gacmo-gashiyada. Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA macmiilka ayaa wuxuu fadhiyaa miis ama wuxuu jiifaa sariir inta daryeelkan la bixinayo.		
Daryeelka Ciddiyaha - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq oo gasho gacmo-gashiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo ku shub baaquli. Xaqiiji in biyuhu yihiin amaan iyo in heerkulkoodu yihiin kuwo uu raaxo ku dareemo macmiilka. Isku hagaaji haddii loo baahdo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyaha saar meel uu raaxo ku dareemayo macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka farahiisa geli biyaha una oggolow in ay qoyaan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Taabasho ku qalaji gacanta macmiilka oo ay ku jiraan inta u dhaxeysa faraha, ka hor qaabeynta ama nadiifinta ciddiyaha macmiilka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qalaji gacanta macmiilka adigoo ku taabanaya shukumaan, ma ahan in aad ku tirtirtid	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Istakiin ku nadiifi cidiyaha hoostooda. Istakiinka ku tirtir warqadda lagu tirtiro ka-dib nadiifinta ciddi kasta.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ciddiyaha ku nadiifi soofe ama cidiye-xaquuq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hore iyo gadaal ugu wad boodh-ka ciddiyaha lagu soofeeyo oo haku fogaanin geesaska maadaama ay tani keeni karto ciddida in ay kala-jabto oo ayna daciifiso ciddiyaha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ciddiyaha u soofee min dhinac ilaa dhinac oo hal jiho oo keliya ama soofee caaradda hore ee ciddi kasta min gees ilaa dhexda.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Daryeelka Ciddiyaha - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa (la sii waday):

	HAA	MAYA
Haraga ciddiyaha ka hooseeya waa difaaca caabuqa. Ha jarin haraga ciddiyaha ka hooseeya	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhammee marka ciddiyaha ay noqdaan kuwo siman oo aan lahayn cirifyo xanaf leh	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U soo bandhig in aad looshan u marinayso	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Faaruji, nadiifi baaquliga(yada) biyaha, kaydi qalabka, ka takhalus maryaha la adeegsadey ka-dibna si habboon qashinka ugu rid oo qalaji miiska marka aad habraaca dhammeyso.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo gashiyada iska bixi, gacmaha dhaqo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Haddii macmiilka uu qabo dhibaataada wareegga dhiigga ama sonkorow, Kaaliyaha Daryeelka Guriga waa in uusan u adeegsan istakiin in uu ku nadiifiyo ciddiyaha macmiilka.

Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA macmiilka ayaa wuxuu fadhiyaa miis inta daryeelkan la bixinayo.

Daryeelka Cagta - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq oo gasho gacmo-gashiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad si taxaddar leh u baarto cagta macmiilka ka hor inta aadan bilaabin habraaca adiga oo eegaya inta u dhaxeysa faraha cagta iyo ciribka cagta. Weyddii haddii macmiilku uu leeyahay wax xannuun ah ama meelo xasaasi ah ka hor inta aadan bilaabin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo ku shub baaf adiga oo aan dhaafsiinayn kala-barka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka weyddii haddii heerkulka biyaha uu raaxo ku dareemayo ka hor inta cagta aan gebi ahaanteedaba la gelin. Isku hagaaji haddii loo baahdo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cagta macmiilka gebi ahaanteedaba biyaha geli.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iyada oo si habboon loo taageerayo cagta iyo canqowga guud ahaan inta lagu guda jiro habraaca, cagta ka bixi biyaha, ku dhaq cagta oo dhan, oo ay ku jiraan inta u dhaxeysa faraha gacgta, maro saabuun leh. Biyaha baafka saabuunta ka ilaali si loogu adeegsado biyo raacin ah: (1) iyada oo cagta lagu dhaqayo maro si toos ah saabuun loo mariyay beddelkii saabuunta lagu shubi lahaa biyaha baafka; ama (2) iyada oo la adeegsanayo laba baaf oo kala duwan oo ay biyo ku jiraan: mid loogu talagalay in lagu dhaqo iyo mid lagu raacinayo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubsato in aad saabuunka ku shubto marada lagu dhaqo oo qoyan beddelkii aad si toos ah biyaha ugu dari lahayd	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku dhaq guud ahaan cagta macmiilka inta u dhaxeysa suulasha maro saabuun leh ka-dib marka la qooyo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaca si aad saabuunta ugu dhaqdo cagta iyo inta u dhaxeysa suulasha.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka hor inta aadan wasakhda ka nadiifin ciddiyaha macmiilka hoostooda, si tartiib ah taabasho ugu qalaji cagtiisa oo ay ku jiraan inta u dhaxeysa faraha lugaha.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku nadiifi ciddiyaha hoostooda istakiin. Istakiinka ku tirtir kuna nadiifi warqadda lagu tirtiro ka-dib marka aad ciddi kasta nadiifiso	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si toos ah u qurxi ciddiyaha adiga oo adeegsanaya soofe ama boodhka ciddiyaha lagu nadiifiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hore iyo gadaal ugu noqnoqo adiga oo adeegsanaya boodhka ciddiyaha lagu nadiifiyo oo haku fogaanin geesaska maadaama ay tani keeno karto ciddida in ay kala jabot oo daciifto.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Soofee ciddiyaha adiga oo ka soofeynaya min dhinac ilaa dhinaca kale oo hal jiho oo keliya ah ama caaradda ciddi kasta soofee min gees ilaa dhexda	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haraga ciddiyaha ka hooseeya waa difaaca caabuqa. Ha jarin haraga ciddiyaha ka hooseeya	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhammee marka ciddiyaha ay noqdaan kuwo siman oo aan lahayn cirifyo xanaf leh	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Weyddii haddii macmiilku uu jecel yahay in looshan loo mariyo. Haddii ay sidaa tahay, looshanka gacantaada ku shub ka-dibna mari looshanka guud ahaan cagta macmiilka adiga oo xaqiijinayo in aadan looshanka marin inta u dhaxeysa faraha cagta. Kaga tirtir looshanka xad-dhaafka ah (haddii ay jirto) shukumaan ama warqadaha lagu tirtiro.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka in uu iska beddelo kabaha iyo sharabaadaha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyaha ka daadi, biyo raaci, tirtir baafka, ka-dibna ku celi goobta kaydka ee habboon	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi gacmo-gashiyada ka-dibna gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Haddii macmiilka uu qabo dhibaataada wareegga dhiigga ama sonkorow, Kaaliyaha Daryeelka Guriga waa in uusan u adeegsan istakiin in uu ku nadiifiyo ciddiyaha faraha lugaha ee macmiilka.

Loogu talagalay imtixaanka xirfadaha ee HCA macmiilka ayaa wuxuu fadhiyaa miis inta daryeelkan la bixinayo.

Kuwan soo socda waa talooyin guud oo la adeegsado marka macmiilka lagu caawinayo daryeelka ciddiyaha:		
Si joogto ah uga baar cagaha iyo gacmaha macmiilkaaga isbeddelo midabka ah (gaar ahaan guduudasho), heerkulka, nabarro biyo ku jira, sarmooyin ama xagxagasho, dillaacyo inta u dhaxeysa faraha cagta iyo kuwa gacmaha, ama isbeddelo kale. Diiwaangeli oo ka soo warbixi barar ama guduudasho kasta ee aad ku aragto hareeraha goobta. Had iyo jeer xaqiiji qorshaha daryeelka ka hor inta aan la sameyn daryeelka ciddiyaha.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
La-soco sarmooyinka yaryar oo ilaali nadaafadoodu	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Looshan ha marin inta u dhaxeysa faraha cagaha – looshanka wuxuu sababaa qooyaan dhiirrigeliya koboca fangaska	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ha jarin laababka ciddiyaha faraha ama ha ku qodin hareeraha ciddiyaha macmiil kasta wax af dhuuban leh	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sin, nadiifi ciddiyaha si aad nafis iyo ammaan u siiso macmiilka. Ciddiyaha girgirrada xanafka leh ama afka leh waxay qabsan karaan oo ay jeexi karaan dharka waxayna dhaawac gaarsiin karaan suulasha / faraha. Had iyo jeer ula tacaamul cagaha iyo faraha macmiilka si tartiib ah oo taxaddar leh.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku Caawi Macmiilka Gacan Itaal-daran ama Daciif ah leh Dhar-xirasho - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Weydii macmiilka waxa ay jeclaan lahaayeen in ay xirtaan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Alaabooyinka oo dhan bannaanka soo dhigo, adiga oo jirka macmiilka si tartiib ah oo dabiici ah u dhaqaajinaya, kana fogaanaya xoog iyo fidinta xad-dhaafka ah ee addimaha iyo kala-goysyada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka in uu gacanta itaal-daran uu geliyo gacanta saxda ah ee shaatiga, funaanad dhaxameedda, ama u geli ka hor inta dharka aan la gelin dhinaca aan dhibaataada qabin. Geli shaatiga gacantiisa gacanta itaalka daran ka hor inta aadan gelin gacanta kale	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ugu baaq macmiilka in uu dharkiisa xirto.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubso macmiilkae client in uu fadhiyo marka uu surwaalka uu gelinayo caqahiisa iyo lugahiisa marka lagu caawinayo xirashada kabaha aan lagu taraaraxaynin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Taageero sii macmiilka marka uu kor u qaadanayo oo uu xiranayo surwaalka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku dhammee macmiilka oo si habboon u labbisin (dharkii oo dhinaca saxda ah kor soo marsanisan (dharkii oo dhinaca saxda ah kor soo marsan, siibabka ama jiinyeerara / galuusyada oo xiran ama dhuujisan, iwm.)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu awooddo in uu istaago. Macmiilka wuxuu xiran yahay funaanad iyo nigis ama hoosgashi wuxuunna u baahan yahay in loo xiro shaati, surwaal, sharabaadyo, iyo kabo. Macmiilka waxaa loogu kor labbesi doonaa dharka ay xiran yihiin.		
Macmiilka u Geli Lug-gashi ama Sharabaadyo Dhaadheer oo Laastiik ah - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U diyaari lug-gashiga/sharabaada dheer in la adeegsado adiga oo dhinaca gudaha xiga kor soo marinaya, ugu yaraan ilaa meesha ciribka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Saar cagta lug-gashiga/sharabaada dheer faraha cagta, cagta, iyo ciribta, adiga uu cagta iyo lugta macmiilka u dhaqaajinaya si dabiici ah, taageeraya cagta kana fogaanaya xoog ama fidinta xad-dhaafka ah ee addimaha iyo kalagoosyada.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Kor ugu jiid dusha sare ee lug-gashiga/sharabaada dheer cagta, ciribta, iyo lugta.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubso lug-gashiga/sharabaada dheer in ay tahay mid sulub ah, oo aan lahayn duuduubnaan iyo kuuskuus, iyo in aysan ku giigsaneyn faraha cagta ee macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adeegsiga dhammeystiran ee lug-gashiga/sharabaada dheer ee cagta iyada oo faraha cagta iyo ciribtaba ay ku aaddan yihiin boos habboon oo waafaqsan nakh-shadda lug-gashiga/sharabaada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka tag lug-gashiga/sharabaada dheer oo ilaa jilibka kor u qaatan oo duuduubna aan lahayn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu sariir jiifo inta daryeelkan la bixinayo.		
Dhaqdhaqaaqa Kala Duwan ee Halka Garan - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adiga oo taageeraya addinka oo loo marayo jimicsiyadan soo socda, si habsami la'aan ah, deggan, oo tartiib ah u dhaqaaji kalagoosyada dhaqdhaqaaqa kala duwan ilaa inta laga gaarayo barta iska caabbinta. Jooji haddii uu xanuun yimaado	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka weyddii heerka raaxadooda inta jimicsiga uu socda oo dhan. Jooji haddii uu xanuun yimaado	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Taageer gacanta macmiilka adiga oo ka qabanaya xusulka hoostiisa iyo curcurka, inta aad sameynayo dhaqdhaqaaqada kala duwan ee garabka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Dhaqdhaqaaqa Kala Duwan ee Halka Garan - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa (la sii waday)::		
Kor-u-qaad gacanta toosan ee macmiilka adiga oo ku toosinaya saqafka/xagga sare, ka-dibna dib ugu toosinaya dhanka Madaxa Sariirta (HOB) kuna celi boos siman sida hal cel-celis (fidinta / soo laabidda garabka). Ku celceli ugu yaraan saddex (3) jeer.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacanta macmiilka oo toosan ka fogee jirka dhinaciisa adiga oo u dhaqaajinaya dhanka madaxa sariirta (HOB) ka-dibna ku soo celi gacanta toosan ee macmiilka khadka dhexe ee jirka macmiilka sida hal ku celcelin (ku soo dhoweynta / ka dheeraynta garabka khadka dhexe ee jirka) Ku celceli ugu yaraan saddex (3) jeer.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Waxaad suxulkan macmiilka oo debeansan dhigtaa ama ku meelaysaa heerka garabka macmiilka, dhudhunka u wareeji dhanka madaxa sariirta (HOB) ka-dibna dhudhunka u rog ama u wareeji dhinaca hoose ee dhanka sinta. Ku celceli ugu yaraan saddex (3) jeer.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu sariir jiifo inta daryeelkan la bixinayo.		
Dhaqdhaqaaqa Kala Duwan ee Hal Jilib iyo Canqow ee Aan Firfircooneyn - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adiga oo taageeraya addinka macmiilka oo loo marayo jimicsiyadan soo socda, si habsami la'aan ah, deggan, oo tartiib ah u dhaqaaji kalagooyaska dhaqdhaqaaqa kala duwan ilaa inta laga gaarayo barta iska caabbinta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Jilibka: ka taageer lugta macmiilka kalagoosyada jilibka iyo canqowga, inta aad sameynayso dhaqdhaqaaqada kala duwan ee jilibka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka weyddii sida uu dareemayo inta jimicsiga lagu guda jiro. Jooji haddii uu xanuun yimaado.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Jilibka gadaal u laab ilaa barta iska caabbinta ka-dibna soo celi adiga oo lugta ku fidinaya sariirta (waxaa ku celi toosinta jilibka sida hal ku celcelin ahaan – fidinta / soo laabidda jilibka). Ku celceli ugu yaraan saddex (3) jeer.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Canqowga: taageer cagta iyo canqowga inta aad sameynayso dhaqdhaqaaqa kala duwan ee canqowga	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cagta u riix xagga hore ee dhanka lugta, ka-dibna dhaqaaq kale cagta oo aaddisan dhanka cagta sariirta riix hal ku celcelin ahaan (fidinta / soo laabidda canqowga). Ku celceli saddex (3) jeer.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu sariir jiifo inta daryeelkan la bixinayo.		
Ku Caawi Macmiilka in uu Wax Cuno - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubso in macmiilku uu qaab toosan ugu fadhiyo kursi ka hor inta aysan caawimaaddu bilaaban.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka sii dufan-dhowr ama wax dharka cuntada uga ilaaliya	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Fariiso meel ku aaddan heerka isha ee macmiilka si aad macmiilka ugu caawiso in uu wax cuno	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sii cunto cadad ah oo le'eg af-gashi, noocyada kala duwan ee cuntada oo isku daba xiga sii ama weyddii macmiilka af gashi/goosasho kasta cuntada uu doorbidayo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cabbitaan sii macmiilka inta uu cuntada cunayo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubso in macmiilka afkiisu uu eber yahay ka hor inta aadan siinin af-gashiga/goosashada xigta ama kabbashada cabbitaannada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Wada sheekaysi la yeelo macmiilka inta lagu guda jiro waqtiga cuntada oo dhan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka tirtir cuntada macmiilka afkiisa iyo gacantiisaba hadba sida loo baahdo iyo dhammaadka cuntada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka bixi dufan dhowrka ama waxa dharka cuntada uga ilaaliya, haddii uu xirtay, ka-dibna ku rid weel habboon	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qaad cuntada soo hartey	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Miiska ka tag isaga oo nadiif ah, qalalan, oo aad ka qaadey agabka cuntada ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu fadhiyo miis marka uu bilaabanayo daryeelka xirfaddan.		
Ku Caawi Macmiilka Qubeyska Sariirta - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
In aad Gashato gacmo-gashiyo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qaad ama dib u laab gogosha kore ee sariirta. Ka dhig macmiilka mid ku daboolan bustaha qubeyska ama go'a kore.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ka bixi dharka uu ku seexdo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hubso in heerkulka biyaha ay amaan yihiin waxaadna macmiilka ka xaqiijisaa in uu yahay heerkul uu raaxo ku dareemayo Isku hagaaji haddii loo baahdo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Ku Caawi Macmiilka Qubeyska Sarriirta - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa (la sii wadey):

	HAA	MAYA
Biyaha baafka saabuunta ka ilaali si loogu adeegsado biyo raacin ah ahaan: (1) iyada oo lagu dhaqaya marada lagu dhaqo oo saabuunta si toos ah loogu shubay marada lagu dhaqo beddelkii saabuun lagu dari lahaa baafka biyaha; ama (2) iyada oo la adeegsanayo laba baafaf oo biyo ah oo kala duwan: mid loogu talagalay in lagu dhaqo iyo mid lagu biyo raacinayo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Beddel biyaha mar kasta oo ay saabuunta ka badato, qaboobaan, ama ay qalalaa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Madaxa / qoorta macmiilka gadaashooda dhig shukumaan qalalan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qoy marada lagu dhaqo (oo aan saabuun lahayn) ka-dibna ka bilow indhaha. U isticmaal meel kale oo marada lagu dhaqo ah il kasta, iyada oo la dhagayo gudaha ilaa geeska kore.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhaq wejiga intiisa kale, dhegaha, iyo qoorta adiga oo adeegsanaya saabuun (haddii macmiilka uu doorbidayo).....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaci, goobta shukumaan ku qalaji – taabo, oo ha tirtirin.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hal gacan soo bixi ka-dibta shukumaan hoosta ka geli. Ku taageer gacanta macmiilka calaacasha gacantaada adiga oo ku celinaya suxulka macmiilka hoostiisa. Dhaq kirkisha, garabka, iyo gacanta macmiilka. Biyo raaci ka-dibnaraabasho ku qalaji.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacanka macmiilka geli biyaha baafka. Dhaq gacanta macmiilka, biyo raaca, ka-dibna taabasho ku qalaji. Ku celi gacanta iyo cududda kale.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhaq, biyo raaci, ka-dibna raabasho ku qalaji xabadka iyo caloosha macmiilka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Fayd oo marada ka qaad mid ka mid ah lugaha macmiilka ka-dibna tuwaal ama shukumaan dherer ahaan hoosta ka dhig cagta iyo lugta. Jilibka laab lugtana cududaada ku taageer. Lugta dhaq, biyo raaci ka-dibna raabasho ku qalaji.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cagta macmiilka geli biyaha baafka. Cagta macmiilka dhaq, biyo raaci, ka-dibna taabasho ku qalaji. Ku celi lugta iyo cagta.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka in uu isu geddiyo dhinaca kale, ee adiga kaa fog. Waxaad dhabarka dherer ahaan uga saartaa bustaha qubeyska ama tuwaal Dhaq dhabarka iyo bariyaha macmiilka, biyo raaci, ka-dibna raabasho ku qalaji.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ka caawi dhabarkiisa. Macmiilka sii asturnaana uu ku qabsado daryeekiisa gaarka ah ee saxaaxa ama xubinta taranka iyo aagga saxarada (haddii uu awood); Haddii kale, hawshan si gaar ah ayaa loo caymiyaa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka tag macmiilka oo ku daboolan go'a kore iyo/ama buste dhammaadka daryeelka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Bixi ama qaad gogosha laga yaabo in qoysay.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dharka iyo go'yaasha wasakhoobay geli weel ku habboon.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyaha ka daadi, nadiifi, jeermiska ka dil baafafka qubeyska ka-dibna ku celi kaydka habboon.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi ka-dibna tuur gacmo-gashiyada wasakhoobay.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Ka Caawi Daryeelka Saxaaxa - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Baafka biyo ka buuxi, adeegso biyo heerkulkoodu amaan ah oo uu raaxo ku qabo macmiilka. Hagaaji oo ka dhig sida uu kaa codsado.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashiyo xiro inta aad bixinayso daryeelka saxaaxa, inta aad biyo raacinayso oo qalajinayso qalabka iyo marka aad qaadayso marooyinka wasakhoobay.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gogosha macmiilka ka ilaali in qoydo adiga oo adeegsanaya tuwaal ama suufka sariirta ee la tuuro.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Fayd ama marada ka qaad saxaaxa. Hubso in asturnaanta macmiilka la ilaaliyo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyaha baafka saabuunta ka ilaali si loogu adeegsado biyo raacin ah ahaan: (1) iyada oo lagu dhaqaya marada lagu dhaqo oo saabuunta si toos ah loogu shubay marada lagu dhaqo beddelkii saabuun lagu dari lahaa baafka biyaha; ama (2) iyada oo la adeegsanayo laba baafaf oo biyo ah oo kala duwan: mid loogu talagalay in lagu dhaqo iyo mid lagu biyo raacinayo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si tartiib ah u dhaq guud ahaan aagga saxaaxa adiga oo adeegsanaya maro saabuun leh. U isticmaal meel nadiif ah oo marada lagu dhaqo ah marin kasta. Nadiifi adiga oo ka bilaabaya xagga hore ilaa xagga dambe ee aagga saxaaxa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyo raaci guud ahaan aagga saxaaxa adiga oo adeegsanaya marada lagu dhaqo oo nadiif ah. U isticmaal meel nadiif ah oo marada lagu dhaqo ah marin kasta. Biyo raaci adiga oo ka bilaabaya xagga hore ilaa xagga dambe ee aagga saxaaxa.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si tartiib ah taabasho ugu qalaji aagga saxaaxa, adiga oo ka bilaabaya xagga hore ilaa xagga dambe.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ku caawi in uu dhinac isu geddiyo. Hubso in macmiilka uu masafo amaan ah u jiro sariirta qarkeeda...	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhaq, biyo raaci ka-dibna raabasho ku qalaji bariyaha iyo agagaarka futuda. U isticmaal meel nadiif ah oo marada lagu dhaqo ah marin kasta. Tirtir adiga oo ka bilaabaya xagga hore ilaa xagga dambe si aad uga fogaato in aad wasakheyso aagga saxaaxa ama goobta xubnaha taranka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Beddel suufka sariirta ama go'a hoos loo dhigo, haddii loo baahdo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Yaree fayditaanka jirka macmiilka inta lagu guda jiro habraaca.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka tag macmiilka oo ku daboolan go'a kore iyo/ama buste dhammaadka daryeelka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qaad marooyinka lagi dhaqo ee qooyan ama wasakhoobay, tuwaalada, suufka sariirta, gogosha, ama dharka. Ku astur weelasha ku habboon.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska-bixi oo tuur gacmo-gashiyada wasakhoobay.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska dhaq.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA oo macmiilku ay tahay shay muuqaal dumar ah leh. Macmiilku waxay jiidtaa sariirta inta daryeelkan la bixinayo. Xirfaddan waxaa la sameyn doonaa iyada oo la adeegsanayo saabuun iyo biyo ee lama adeegsan doono masax/tirtiro.

Daryeelka Kateetarka - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tijaabi heerkulka biyaha baafka ku jira. Go'aami haddii heerkulka biyaha uu yahay mid amaan ah oo ka xaqiiji macmiilka in uu yahay mid raaxo leh wax ka beddel haddii loo baahdo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Biyaha baafka saabuunta ka ilaali si loogu adeegsado biyo raacin ah ahaan: (1) iyada oo lagu dhaqaya marada lagu dhaqo oo saabuunta si toos ah loogu shubay marada lagu dhaqo beddelkii saabuun lagu dari lahaa baafka biyaha; ama (2) iyada oo la adeegsanayo laba baafaf oo biyo ah oo kala duwan: mid loogu talagalay in lagu dhaqo iyo mid lagu biyo raacinayo.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Yaree fayditaanka jirka macmiilka inta uu socdo daryeelka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashiyo gasho, ka hor inta aadan gacanta ku qaban kateetarka, tuubooyinka, bacda ay kaadidu ku ururto ama inta aadan bilaabin nadiifinta iyo guud ahaan inta uu socdo habraaca inta aad bixinayso daryeelka kateetarka, inta aad biyo raacinayso oo qalajinayso qalabka iyo marka aad qaadayso marooyinka wasakhoobay	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka dhig meel ay masaafu amaan ah u jirta geeska sariirta haddii dhinac loo rogo inta daryeelka uu socdo...	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tuwaal ama suuf hoos dhig tuubooyinka kateetarka ka hor inta aadan dhaqin si aadan u qoynin go'ayaasha iyo dharka macmiilka inta lagu guda jiro nadiifinta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Marada ka qaad keliya aagga kateetarka ku hareeraysan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Maro saabuun leh u adeegso in aad ku nadiifiso kateetarka.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Isla meesha ku beddel marada lagu dhaqo ee loogu talagalay dhaqid kasta iyo marinta biyo raacinta ah. Kateetarka ha soo jiidin. Kateetarka ka qabo meel u dhow afka meesha uu jirka ka galo si aad uga fogaato in aad soo jiidid.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Nadiifi ugu yaraan afar inji oo kateetarka ee ugu dhow afka ama daloolka kaadi-mareenka, adiga oo ka soo bilaabaya afka ka dibna soo aadaya dhanka hoose ee ka fog jirka. U isticmaal meel nadiif ah oo marada lagu dhaqo ah marin kasta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Adiga oo adeegsanaya maro kale oo lagu dhaqo, biyo raaci ugu yaraan afar inji oo kateetarka ah ee ugu dhow afka, ka soo bilow afka ilaa dhanka hoose ee ka fog jirka, adiga oo u isticmaalaya meel nadiif ah oo marada lagu dhaqo ah marin kasta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Taabasho ku qalaji meel kasta oo maqaarka macmiilka ah ee laga yaabo in ay qooyan tahay.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Qalaji meelaha maqaarka ee qoyay intii lagu guda jiray daryeelka iyo go'yaasha sariirta marka aad dhammeysto daryeelka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Bacda kaadida lagu ururiyo ka hoos mari meesha uu ku aaddan yahay kaadihaysta inta uu daryeelka socdo iyo dhammaadka habraaca. Hubso in aysan qalqaloo iyo laablaab ku jirin tuubooyinka kateetarka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tuwaallada iyo agabyada kale ku rid weelal habboon	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Marka uu daryeelka dhammaado ka tag macmiilka oo go'a kore kor kaga daboolan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi ka-dibna tuur gacmo-gashiyada islamarkaana gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu sariir jiifo inta daryeelkan la bixinayo.		
Daryeelka Kateetarka Cinjirka ah		
	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashiyo gasho.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Marada ka qaad aagga xubinta taranka ragga oo keliya.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si taxaddar leh u dhaq una qalaji guska, ka jar timaha dhaadheer	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U fiirso oo ka eeg maqaarka guska meelo furan.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Haddii ay jiraa nabarro ama meelo diiran, ha u xirin cinjirka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku dheji guska koollada maqaarka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku duub kateetarka cinjirka ah meesha guska.....	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Cinjirka ku dheji tuubooyinka. Eeg in afka hore ee cinjirka in uusan qalooqneyn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tuubooyinka ku xir/ku dheji lugta macmiilka. Hubso in bacdo ay ka hooseyso heerka kaadihaysta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi ka-dibna tuur gacmo-gashiyada islamarkaana gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Caawiimaadda Daawooyinka - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Eeg jadwalka daawooyinka macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xusuusi macaamiisha in la gaarey waqtigii ay qaadan lahaayeen daawooyinkii loo soo qoray	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dooro dhalada daawada ee saxda ah, ee ku calaamadeysan magaca macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Weelka daawada ka soo qaad halka lagu kaydiyay, eeg calaamadda, ka-dibna xaqiiji 5 waxyaabood ee Sax - daawada, macmiilka, xaddiga, meesha laga qaato, iyo waqtiga	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Weelka fur, eeg calaamadda ka-dibna mar kale xaqiiji 5 waxyaabood ee Saxa ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Daawada ka soo geddi dhalada kuna shub furta adiga oo aan taaban daawooyinka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka sii tirada saxda ah ee kiniiniyada adiga oo ka soo geddinaya furka kuna shubaya gacantooda adiga oo aan taaban daawada	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka u tilmaan ama u sheeg in uu qaato daawooyinka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ku caawi macmiilka in uu daawooyinka qaato adiga oo aan saarin gacantaada gacanta macmiilka ama adiga oo aan gacanta macmiilka saarin kiniini(yo) si uu geliyo afkiisa, ama adigoon si toos ah ugu ridin kiniinifga afka macmiilka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka sii galaas buuxo oo dareere ah (loogu talagalay daawooyinka afka laga qaato)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
U fiirso oo hubso in daawooyinka la qaatey. Weyddii macmiilka ama eeg haddii daawada la laqey	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Xir weelka daawooyinka ka-dibna dib ugu celi meel ku habboon; mar kale xaqiiji shanta (5) xuquuqood	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Diiwaangeli in macmiilka uu daawooyinka qaatey. Haddii aysan qaadan, sidoo kale taa diiwaangeli	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmaha iska-dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Loogu talagalay Imtixaanka xirfadaha ee HCA ee macmiilku uu sariir jiifo inta daryeelkan la bixinayo.		

Ku Caawi Macmiilka Isticmaalka Tuunjiga - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
In aad adeegsato S.W.I.P.E.S. Xirfadaha War-iswaarsiinta / Xuquuqaha Macmiilka iyo Hab-dhaqanka Daryeelka Guud	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ka hor inta aadan tuunjiga u dhigin, hoos u dhig madaxa sariirta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashi xiro si aad tuunjiga si sax ah ugu hoos dhigto bariyaha macmiilka (tuunjiga caaddig ah: tuunjiga u dhig si dhammaadka ballaaran ee tuunjiga uu ugu hagaago bariyaha macmiilka; tuunjiga dhanka jabsan leh (fracture pan): tuunjiga u dhig iyada oo dhegta/meesha la qabsado ay ku aaddan tahay cagta sariirta). Macmiilka jilbihiisa ha laab oo miskahiisa kor ha u qaado (haddii uu awoodo)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sariirta madaxeeda kor u qaad ka hor inta aadan tuunjiga dhigin macmiilka hoostiisa	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Warqadaha musqusha ee lagu tirtiro dhig meel uu macmiilka gaari karo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macamiisha weyddii in ay ku soo ogeysiyaan marka ay dhammeystaan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka ku dabool go'a sariirta la saarto ama buste	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sariirta madaxeeda hoos u dhig ka hor inta aadan tuunjiga bixin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashiyo gasho ka hor inta aadan tuunjiga bixin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Tuunjiga bixi ka-dibna saxarrada iyo wixii ku jiraba ku shub musqusha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Bixi daryeelka saxaaxa (raac habraacyada liisto-hubineedda)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si waafaqsan borotokoolka u nadiifi oo jeermiska uga dil qalabka. Ku celi kaydka habboon	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi ka-dibna tuur gacmo-gashiyada islamarkaana gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Ugu Xiir Sakiin Amaan ah - si aad ugu guuleysato in aad xirfaddan soo bandhigto ayaa waxaad u baahan doontaa:

	HAA	MAYA
Isticmaal Xirfadda S.W.I.P.E.S.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacmo-gashiyo gasho	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Macmiilka weyddii haddii ay xirtaan xirmooyinka ilkaha ee gacan ku sameyska ah. Haddii ay sidaa tahay, hubso in ay afkooda ku jiraan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Wejiga ku dhaq maro lagu dhaqo qooyan oo diirran	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Mari xumbada xiirashada goobta aad u xiiri doonto	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Si amaan ah u qabo sakiinta	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Gacanta kale ku qabo maqaarka oo giigsan ka-dibna ugu xiir dhaqdhaqaaqyo hamsami la'aan ah oo siman oo ku jihaysan jihada timaha	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Sakiinta amaanka ah raaci biyo diirran inta u dhaxeyso marinta si aan uga dhigto sakiinta mid nadiif ah oo qoyan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Marka hore dhinacyada xiir, ka-dibna sanko iyo afka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dhaq, biyo raaci, oo qalaji weji	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Nadiifi oo meel dhig qalabka	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Iska bixi ka-dibna tuur gacmo-gashiyada islamarkaana gacmaha iska dhaq	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Liisto-hubineedda Habraaca Ku Dhaqanka Xirfadaha ee Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga DSHS Ansaxisay

Xaqiijinta Tababarka Ku Dhaqanka Xirfadaha Shaqada Lagu Qaato ee HCS Waxaa Bixiya Tababaraha(yaasha) Xarunta ee AFH, ALF, ama ESF

**Skills Practice Procedure Checklist for Home Care Aides DSHS Approved
Verification of HCS On The Job Skills Practice Training
Provided by Facility Instructor(s) in an AFH, ALF, or ESF**

Boggan waa in loo diraa Qaybta Tababarrada waxaanna loogu talagalay musharrax kasta ee ah Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee xaruntaada ku dhammeeyay tababarka xirfadaha ee Shaqada Gudaheeda lagu qaato.

Emailka ugu soo dir, **boggan oo keliya TrainingApprovalTPA@dshs.wa.gov** inbox. Geli xariiqa mowduuca “Facility On-The-Job Training”.

_____ ayaa si guul leh u soo bandhigay, isaga oo la shaqeynaya
MAGACA ARDAYGA
macmiil, joogitaanka macallinka xarunta ay DSHS ansaxisay, dhammaan tallaabooyinka muhiimka ah ee loogu baahan yahay hawlaha daryeelka shakhsi ayaa ku jira liisto-hubineeddan habraaca.

MAGACA XARUNTA		LAMBARKA TABABARKA XARUNTA WA	
SAXIIXA MACALLINKA	MAGACA QORAN EE MACALLINKA	LAMBARKA KOODHKA TABABARKA MACALLINKA	
SAXIIXA ARDAYGA	MAGACA QORAN EE ARDAYGA	TAARIKHDA DHAMMEYSASHADA	

Fadlan Ogow: Dhammaan hawlaha xirfadaha waa in uu dadka baraa macallinka xarun la ansaxiyay islamarkaana waa in uu muujiyay ama soo bandhigay shaqaale Kaaliyaha Daryeelka Guriga ah. Marka loo baahdo, haddii macmiil aan la heli karin ama la waayo macmiil doonaya in uu ka qaybgalo habraaca tababarka xirfado gaar ah, waxqabadka xirfadaha kaaliyaha daryeelka guriga ayaa lagu qiimeyn karaa iyada oo la adeegsanayo shay qof u eg ama lammaane tababar.

Boggan looma baahna in la buuxiyo oo dib loogu soo celiyo DSHS haddii tababarka xirfadaha kaaliyaha uu Bare Bulsho oo qandaraas la galey DSHS ku bixiyo shaybaarka xirfadaha.